

# Waraaqda Xaqiiqooyinka Xeerka Cuntada #28

Waxa loo baahan yahay in aad ka ogaato Xeerka

WWW.HEALTHOREGON.ORG  
/FOODSAFETY

OAR 333-150-0000,  
CUTUBKA 2-401.11

(A) Marka laga reebo sida ku cad (B) ee qaybtaan, shaqaaluhu waa in uu ku cunaa, ku cabaa, ama uu ku isticmaalaa nooc kasta oo kamid ah tubaakada kaliya meelaha loogu tala galay halkaasoo aysan ka imaan karin wasakhawga cuntada aan daboolnayn, qalabka nadiifka ah, maacuunta, iyo maryaha, waxyaabaha halka mar la isticmaalo lana adeegsado ee aan waxba ku duubnayn; ama waxyaabaha kale ee u baahan ilaalinta.<sup>PF</sup> (B) Shaqaalaha cuntadu wuxuu wax ka cabi karaa weel cabitaan oo daboolan haddii weelka loo maamulo si looga hortago wasakhawga:

- (1) Gacmaha shaqaalaha;
- (2) Weelka; iyo
- (3) Cuntada aan daboolnayn; qalabka nadiifka ah, maacuunta, iyo maryaha; iyo waxyaabaha halka mar la isticmaalo halka marna lagu adeegto ee aan waxba ku duubnayn.

## SABABAH LA XIRIIRA CAAFIMAADKA BULSHADA:

Habdhaqamada wanaagsan ee fayadhowrka waa in shaqaalaha cuntadu raacaa marka uu samaynayo howlaha loo xilsaaray si loo yareeyo suurtagalnimada gudbinta cudurka ayada oo cuntada lagu gudbinayo. Cunista ama isticmaalka cabitaanada ee shaqaalaha jooga goobaha cuntada lagu diyaarinayo waa mamnuuc sababtoo ah suurtagalnimada in ay gacmaha saaraan afka ama sankaa ama meel u dhow taasoo wasakhaynaysa gacmaha, cuntada, qalabka nadiifka ah, maacuunta iyo waxyaabaha halka mar la isticmaalo.

Maadaama kululaynta xad-dhaafka ah ee meelaha cuntada lagu diyaariyo qaarkood ay biyaha jirka ka saari karto shaqaalaha ayna keenayso khatar caafimaad, shaqaaluhu waxay ka cabi karaan weelal si adag loo daboolay oo gacan iyo tuubo leh. Weelka cabitaanka waa in si taxaddar leh loo qabtaa si looga hortago wasakhawga gacmaha iyo goobaha cuntada lagu diyaarinayo.

## Koobabka Shaqaaluhu wax ku Cabayo

Shaqaalaha adeegga cuntadu wuxuu ka cabi karaa weel cabitaan oo daboolan ayada oo uu ku daboolan yahay aabur aad ugu dhagan iyo tuubo ama gacan. Arintaan kaliya waxaa la ogolyahay haddii dadka cuntada ka shaqaynaya ay yihiin kuwo ka taxadaraya si looga hortago wasakhawga gacmaha, maacuunta, qalabka iyo cuntada. Cabitaanka qofku gaarka u leeyahay waa in lagu hayaa laguna isticmaalaa goob loogu tala galay si loo yareeyo suurtagalnimada gudbinta jeermisyada la socda candhuufta kuwaas oo sababi kara cudurka.

Daboolka iyo gacanta ama tuubadu waxay gacan ka gaysanayaan in cuntadu ahaato mid ammaan ah ayaga oo samaynaya difaac u dhexeeya gacmaha iyo candhuufta. Laakiin haddii koobabkaan aan si sax ah loo isticmaalin, waxay wasakhayn karaan gacmaha ugu danbayna cuntada aad taabanayso.

Ka fogow taabashada qayb kamid ah meesha afku ka taabanayo weelka cabitaanka, haddii kale gacmuhu waxay u baahan yihiin in la dhaqo kahor inta aan la taaban cuntada ama oogo kale oo cuntadu taabato.

Marka lagu daro in ay leeyihiin fur xog ugu dhagan iyo gacan ama tuubo, weelasha cabitaanka ee dib loo isticmaali karo waa in ay dayactir wanaagsan kujiraan loona nadiifin karaa si fudud. Kahor inta aadan ku isticmaalin weelka cabitaanka kijada ama goobta diyaarinta cuntada xaqiiji in aad gacmaha dhaqato, aad biyoraaciso aadna nadiifiso koobka inta u dhexaysa xiliyada ama islamarkiiiba marka weelku ka wasakhoobo meelaha gacmaha iyo oogadu iska taabtaan.

## La ogolyahay: Fur+ Gacan ama Fur + Tuubo



## Aan la Ogolayn:



Ayada oo fur leexanaya uu **furmayo** markasta

Ayada oo tuubado **kor** u taagan tahay